



MARCH 2011

## BEN WAXA UU LAHAA 411KA FRANKLIN

Waxaad tahay ardayda ku faraxsan BizTech, Pauling ama RA2. Waxaad nooshahay xiligan, waxaad sidoo kale ka fikiraysaa mustaqbalka.

Bisha June, waad isaga tegi doontaa Xarunta Marshall iyo fasaxa xagaaga ka dib, adiga oo bilaabaya dugsi cusub.

Waxaad qabtaa su'aalo. Sababta wargayskan loo unkay ayaa ah in uu ka jawaabo. Waa kuwan eray ka yimi ardayda Franklin.

### SIDEE BAY ARDAYDU UBILAABAAN MAALINTOODA DUGSIGA FRANKLIN?

Waxaad imanaysaa halka laga soo galo dugsi ee dariiqa Woodward. Dugsi waxa uu bilaabanayaa 8:15 aroornimo, waxaad ka qaadan kartaa quraacdaada saaxadda guud.

### MAXAAD ARKI DOONTAA MARKA AAD GUDAHA SOO GASHO?

- Soo dhawayn iyo dad saaxiibnimadda ku wanaagsan.
- Kala duwanaansho baaxad leh.
- Macalimiin ku daryeelaya iyo tababarayaal sare.
- Kurayo koox koox u taagan khasnadahooda.

### MUXUU KU WANAAGSAN YAHAY FRANKLIN?

Ugu horayn, fasaladda:

- Waxaa jira 26 meelayn sare ah ama fasaladda ubucda u ah oo 11 maado gaadhaya
- Barnaamijyadda ardayda oo aad u hormarsan kulana dhinactamaya ardayda dugsiyadda sare u diyaarinta kuliyaadaha. Waxaa lagaa caawinayaa codsashadda kuliyaadaha, waxaad fursad u helaysaa nqtiimayayaasha ugu sareeya. Iyo in kale oo lagu daray.
- Hadii aad u baahantahay, waxaad barataari kartaa Ganacsiga iyo Macluumaadka Technology-ga. Shaqooyinka caafimaadka, ama sharciiga iyo siyaasadda guud
- Fasaladda farshaxanka mark alagu daro qalabka, kooxda, qoob ka cayaarka, dhoobo qooshida iyo warshadaynta technology-ga

Waxyaabaha kale iyo imika:

- Waxaan leenahay caawinaadda OSAA. Ciyaaro badan oo kuwa deyrta ah oo leh xaaladda xagaaga sidaa awgeed xaaladu way wacantahay kolka xiligu bilowdo.
- Waxaa jira ku dhawaad naadi walba oo ay ardaydu u baahan karaan. Iyo hadii uusan kaasi ahayn kii aad doonaysay, waxaad bilaabi kartaa mid kale.
- Deeqdaa bixinaysa howlaha xiliga dugsi kadib sida tababaraddam yoga, ping pong iyo qaybo kala duwan oo ciyaaraha ah.
- Tartanka fasaladda bilowga ah, heerka dhexe, iyo kuwa gabagabadda ah, dhamaadka sanadka fasalka ugu dhibacaha badan waxa uu helayaa koobka Erickson
- Xiliga udhexeeya xiisadaha waa shan daqiiqo, sida caadiga ahna way ku filantahay inta aad fasaladda isaga gudbayso.
- Ardayda Franklin waxay socdaan — lama joogyano dad qudha xili walba.
- Dugsi oo dhan waxa ay ku kulmayaan garoonka ciyaaraha dhowr jeer sanadkii xaflo tayayn ah

### MAXAY ARDAYDU U HAYSTAAN ARDAYDA BIZTECH, PAULING IYO RENAISSANCE EE IMANAYA SANADKA SOO SOCDA?

- Aad baanu oga helaynaa in ay noo yimaadaan arday cusub..!
- Waa sugi la'nahay inta ay noo imanayaan arday cusub oo ciyaartooy ah. Waxay naga caawinayaan xoojinta kooxeheena.

### MAXAY KU KALA DUWANYIHIIN?

- Franklin wuxuu yeelanayaa laba jibaar ardayda Xarunta Marshall.
- Franklin waa hal dugsi, ma ahan sadex dugsi oo hal dhisme wada adeegsanaya.

### MAXAY ISAGA MID YIHIIN?

- Dugsi maalintii waa isaga mid: 8:15 aroor illaa 3:15 fiid
- Franklin waxa uu ku tartamaa xagga ciyaaraha heerka 5A; Xarunta Marshall waa heerka 4A. Walow aad weli la ciyaarayso dugsiyadda kale ee PPS.
- Barnaamijka ee Marshall waxa uu wareegi doonaa Franklin deyrta.
- Xarun Caafimaad oo dugsi leeyahay ayaa laga furayaa Franklin deyrta.

### HOGAANKA

Fasalka Hogaanka ee Franklin Waxaa Ka Mid ah:

- Ardayda loo doorto xilalka qaar waxay ma talayaan dugsi iyo fasaladda qaar.
- Ardayda oo lagu doorto tayadooda hogaamineed
- Fasaladda hogaanka waxay u kordhayaan sanadka soo socda illaa 30 arday marka lagu daro ardayda imika ee BizTech, Pauling iyo RA2
- Doorashadda iyo xulida waxay dhici doonaan horaanta bisha April

### LINK CREW

Gudashadda kooxdu waa dhiifoonyihiin, hogaamiyayaasha iyo kormeerayaasha ayaa caawinaya ardayda cusub si ay ugu najaxaan dugsi sare. Hadii aad tahay ardayda heerka labaad iyo wixii ka sareeya waxaa lagugu marti qaaday in aad codsato Link Crew.

Waxaad u baahan doontaa in aad buuxi codsi oo aad keento laba warqadood oo ay soo qoraan macalimiintaadda ama maamulka dugsi aad imika dhigato.

Codsiga waxaa la heli karaa horaanta bisha April waxa uuna ku egyahay April 29.

---

## **MAXAAN SAMEEYAA SI AAN ISUGU DIYAARIYO DUGSIGA SANADKA SOO SOCDA?**

Diiwaangilintu waa dhamaadka August. Waxaa lagu soo diri doonaa, kadib soo celi marka aad isu diiwaangelinayso fasalka goorta la joogo garoonka. Ardayda cusub waa laga caawin doonaa diiwaangelinta.

## **SIDEE U HELAYAA MEEL AAN WAX KU KAYDSADO?**

Waxaa lagu siinayaa khasnad marka aad isdiiwaangelinayso.

## **XAGEE QADADA KA CUNAA?**

Ardaydu waxay wax ka cunaan saaxadda dugsiag iyo fasaladda macalimiinta, maqaayadda iyo dibadda dugsiaga: Suuqa Franklin eek u yaala 50 iyo Woodward, Dairy Queen ku yaala Division, iyo food carts 50th iyo Division

## **FRANKLIN AYUU AHAA?**

Benjamin Franklin (1706-1790) waxa uu ahaa Philadelphia, Pennsylvania, daabace, qoraa, saynisyahan, hal-abuure, muusikiiste, kacaan, aabbe iyo safiir.

## **WAA MAXAY QUAKER?**

Dadka inta badan magaca mascot waa sharafta imaanta Quaker, waxaa lagu sameeyey dad badan oo reer Philadelphia maalintii Franklin. Qaar waxay leeyihiin magacu waxa uu la saan qaadayaa gidhiidh ama sida kooxa kale ay u gilgilayaan kabahooda marka ay la ciyaarayaan Franklin.

## **MXAY YIHIIN MIDABADA DUGSIGA?**

Casuusi iyo Basali

## **NAADIYADDA NAADIYADDA NAADIYADDA**

Franklin waxa uu leeyahay naadiyo badan – waxaana meel loo heli karaa in badan! Waa kuwan magaoocda:

- Animanga Club**
- Badminton Club**
- Better Movie Club**
- Chess Club**
- Chinese Cultural Club**
- Core Circuit Training**
- Dance Club (Toxic Fusion)**
- Environmental Club**
- Free Tibet Club**
- French Club**
- Gay Straight Alliance**
- Key Club**
- Latino Club**
- Mad House Dancers**
- MESA**
- National Honor Society**
- Poetry Club**
- Pre AP & Honor Biology Club**
- Red Cross Club**
- Russian Club**
- Vietnamese Club**
- Vintage Video Game Club**
- Yu-gi-oh! Club**

## **CIYAARAHA**

### **DHIRIGELINTA**

Xiliga ay kulmayaan xagga macluumaadka:  
April 5, 6:30 Fiid., Franklin Library  
Tijaabadda: April 18-21, 6:30-8 aroor  
Xaaladaynta: Begins June 27  
Xidhiidh: Gina Aman, [gaman@pps.k12.or.us](mailto:gaman@pps.k12.or.us), 503-916-5140, qaybta. 73553

### **ORODADA DHEER**

Tababarka Xagaagag: Waxa uu bilaabanyaa June 27, 10 aroor. iyo/ama 3 p.m. M-F, 10 aroor. Sabti  
Xarunta orodka dheer: Aug. 10-14  
Tababare: James Hennessey, [jhennessey@pps.k12.or.us](mailto:jhennessey@pps.k12.or.us); Jacob Michaels, [jalexmicahels@hotmail.com](mailto:jalexmicahels@hotmail.com), 503-820-8416

### **KUBADDA CAGTA IYO GACANTA**

Xeradda Deyrta: May 31-June 5, 3:45-5:30 fiid.  
Xaaladaynta: Waxaa uu bilabanayaa June 20, MWF, 8-10 a.m., TTh, 5-7 p.m.  
Xeradda xagaaga: July 25-30, 8-10 aroor  
Tababare: Richard Lex, 503-290-8961, [r.lex@comcast.net](mailto:r.lex@comcast.net)

*Fariin ka timid Coach Richard Lex:*

*“Waxaanu aad ugu faraxsanahay kusoo dhawaynta ardayda BizTech, Pauling iyo Renaissance kubadda cagta ee Franklin. Waxaanu filaynaa dhamaanteen marka lagudaro aradyda Marshall xeryaha deyrta iyo xagaaga tayaynta iyo xaaladaynta, iyo kooxda kubadda cagta ee 2011. Ciyaaryahan walba boos wuu ka heli karaa”*

### **KUBADDA CAGTA EE WIILASHA**

Tababrka xagaaga/xirfadaha xiliga: Sadex jeer todobaadkii, June 27-31 iyo Aug. 8-19  
Tababare: Jeremy Savant, [jvsarant@msn.com](mailto:jvsarant@msn.com), 503-252-3330

### **KUBADDA CAGTA WIILASHA**

Tababaradda xagaaga: TBA  
Tababare: Jon Marcus, [jmar24@gmail.com](mailto:jmar24@gmail.com)

### **KUBADDA LALISKA**

Waqtiga Garoon: M-Th, June 20-Aug. 18, 3:30-6 fiid.  
Ciyaaraha Xagaaga: Talaado walba bisha July waxa uu ka dhici Beaverton  
Tababare: Kristie Hopkins-Janssen, 503-737-9943, [Kristie@injurylaworegon.com](mailto:Kristie@injurylaworegon.com) [www.facebook.com/pages/Franklin-High-School-Volleyball](http://www.facebook.com/pages/Franklin-High-School-Volleyball)

Mahadsanid Ardayda Franklin Risa Luther, Maddie Stowell iyo Claire Tannler sidii aad nooga caawiseen wargayskan.

### **Franklin High School**

**5405 SE Woodward, Portland, OR 97206**

**Phone: (503) 916-5140**

**<http://www.pps.k12.or.us/schools/franklin/>**

Dugsiyadda Guud ee Portland waa fursad shaqaaleeyn iyo aqoon loo simanyahay.

---